

FAAFINTA
الرسمية



RASMIGA AH
لجريدة

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 7aad Muqdisho 1 Seteember 1979 L. 9

FAAFINTA BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada JDS

QIIMAHA: waa 5 shillin lambar waliba — **RUKUNKA** Sana-dii waa Sh. 100. Soomaaliya gudeheeda — dibaddana waa Shs 300. Rukunka la weeydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 31 ee 12 Agoosto 1979, Heshiis amaahda ee dhexmaray Jamhuuriyada Dimuqraadiga Soomaaliya iyo Sanduuga Gaarka ah ee OPEC.

LAW N. 31 on 12th Agost 1979, The Loan Agreement between the Government of the Somali Democratic Republic and the OPEC Specal Fund.

SHARCI L. 32 ee 1 Agoosto 1979, Sharci lam. 43 ee 1 Nofeem-ber 1978, wax ka beddelid Sharci lam. 15 ee 25kii Jennaayo 1969; Sharciga Badbaadada Ugaarta iyo Dhirta.

SHARCI L. 33 ee 19 Agoosto 1979, Heshiis Xagga Gaadiidka Cir-ka ee dhexmaray Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaali-ya iyo Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Dadka Kuuriya.

LAW N. 33 on 19th Agost 1979, The Air Tranport Agreement between the Somali Democradic Republic and the Democratic People's Republic of Korea.

QAYBTA LABAAD
W. M.
QAYBTA SADDEXAAD

TALOOPYIN ISGAARSIIN OGEEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE 7. 5. 1979, lumid Buug
Buug Kayd Lamb. 5728 kuna qoran Shs. 220 Sh/ ay leedahay
Caasha Nuur Sali L. 473

MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE 9. 6. 1970, Lumid Buug
Kayd Lamb. 5923 ku qoran 500/= uu leeyahay Aweeys
Abdulaahi Iiko L. 474.

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 21. 8. 1979, Lumid Jeeg
Wareega Lamb. 132524, 132521, 132522 ku qoran midkiiba
Shs. 50.000/= uu leeyahay Aamac Muuse Faarax L. 475

MAXKAMADDA G. BANAADIR 30. 8. 1979 *lumid Buug Kayd*
L. 13796, uu leeyahay Maxamed Xaaji Axmed L. 476.

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 31 ee 12 Agoosto 1979, Heshiis Amaahda ee dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Sanduuqa Gaarka ah ee OPEC.

M A D A X W E Y N A H A

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kaacaanka 21ka Oktoobar, 1969.

ISAGOO ARKAY : Sharciyadda tirsigoodu yahay 1, 17, 18 iyo 19 ee 1dii Luulyo, 1976.

ISAGOO ARKAY : Heshiiska Amaahda ee dhexmaray Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo SANDUUQA GAARKA AH ee OPEC, laguna kala saxiixday Vienna, Usteeriya 16kii Luulyo, 1979.

ISAGOO TIXGELINAAYA : Go'aankii Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiiradda ee 2dii Ogoosto, 1976.

WUXUU SOO SAARAYAA SHARCIGAN SOO SOCDA :

Qodobka 1aad

Heshiiska Amaahda ee dhexmaray Dawladda Jamhuuriyada Dimoqraadiga Soomaaliya iyo SANDUUQA GAARKA ah ee OPEC laguna kala saxiixday Vienna, Usteeriya, 16kii Luulyo 1979, waa la meelmariyey.

Qodobka 2aad

Heshiisku wuxuu ku yeelan doonaa Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya astaan sharci ah, wuxuuna u dhaqan geli doonaa sida waafaqsan qodobkiisa 5aad.

Sharcigan waxa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee JDS.

Muqdisho 12. 8. 1979

LAW N. 31 on 12th Agost 1979, The Loan Agreement between the Government of the Somali Democratic Republic and the OPEC Special Fund.

PRESIDENT OF THE

*SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC
INSTRUMENT OF RATIFICATION*

Having Seen : The 1st, 2nd, and 3rd Charter of October 21st Revolution 1969.

Having seen : Law No. 1, 17, 18, and 19 of 1st July 1976

Having Seen : The Loan Agreement between the Government of the Somali Democratic Republic and the OPEC Special Fund, signed in Vienna, Austria, on 16th July, 1979.

Takin Note : of the approval of the Political Bureau and that of Council of Ministers dated 2nd August, 1979.

Hereby promulgates the following law :-

Article I

The Loan Agreement between the Government of the Somali Democratic Republic and the OPEC Special Fund signed in Vienna, Austria, on 16th July 1979, is hereby ratified.

Article II

This Agreement shall have the force of Law in the territory of the Somali Democratic Republic in accordance with its Article 5.

This Law shall be published in the Official Bulletin of the Somali Democratic Republic.

Mogadishu 12. 8. 1979

MAJOR GENERAL MOHAMED SIAD BARRE

PRESIDENT OF THE

SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

SHARCI L. 32 ee 1 Agoosto 1979, Sharci lam. 43 1 Nofeember 1978, wax ka beddelad Sharci lam. 15 ee 25kii Jannaayo 1969, Sharciga Badbaadada Ugaarta iyo Dhirta.

M A D A X W E Y N A H A

J. D. S.

MARKUU ARKA : Warqadda 1aad, tan 2aad, iyo tan 3aad ee Kacaankii 21. 10. 1979;

MARKII LA TIXGELIYAY : Inay lagama maarmaan tahay in la nabadgeliyo Ugaarta iyo baahallada Waddanka ku nool oo dhaqaalaha Dalka qiimo weyn ugu fadhiiya;

MARKUU ARKAY : In loo baahan yahay in dib loo habeeyo Sharciga Ugaarta iyo Dhirta ee kor ku xusan;

MARKUU ARKAY : Go'aanka Guddiga Siyaasadda iyo Golaaha Wasiiradda ee 26.10. 1978.

WUXUU XEERAYAA

Qodobka 1aad

Waxaa sharciga lamb. 43 ee 1 Nofeember 1978 (Wax ka beddelid sharci lam. 1 ee 25kii Jannaayo 1969; sharciga Badbaadada Ugaarta iyo Dhirta) lagu kordhiyay hal qodob oo u akhrista sida soo socota :-

Qodb. 3/ku celin

Qofkii dembilaha qariya ama ugu kaalmeeya gelitaanka dembiyada ku xusan Sharciga amase si sharci darro ah u iibsada harag, gees iyo wax kastoo ka yimaada Ugaarta iyo Bahallada, wuxuu yeelanayaa ciqaabta ku xusan qodobbada sharcigan.

Qodobka 2aad

Sharcigan wuxuu dhaqan geli doonaa marka uu saxiixoo Madaxweynaha J. D. S. waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho 1 Agoosto 1979

MADAXWEYNAHA J. D. S.

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI L. 33 ee 19 Agosto 1979, Heshiis Xagga Gaadiidka Cirka ee dhexmaray Jamhuuriyada Domuqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Domuqraadiga Dadka Kuuriya

M A D A X W E Y N A H A

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar, 1969.

ISAGOO ARKAY : Sharciyadda tirsigoodu yahay 1, 17, 18 iyo 19 ee 1dii Luulyo, 1976.

ISAGOO ARKAY : Heshiiska xagga Gaadiidka Cirka ee dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Dadka Kuuriya laguna kala saxiixday Muqdisho 9kii Luulyo, 1979.

ISAGOO TIXGELINAAYA : Go'aankii Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiiradda ee 9kii Ogosto, 1979.

WUXUU SOO SAARAYAA SHARCIGAN SOO SOCDA :

Qodobka 1aad

Heshiiska xagga Gaadiidka Cirka ee dhexmaray Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Dadka Kuuriya laguna kala saxiixday Muqdisho 9kii Luulyo 1979.

Qodobka 2aad

Heshiisku wuxuu ku yeelan doonaa Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya astaan sharci ah wuxuuna u dhaqan geli doonaa sida waafaqsan qodobkiisa 21aad, xubinta 2aad.

Sahrcigan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 19. 8. 1979

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)
MADAXWEYNAHA J. D. S.

LAW L. 33 on 19th August 1979, the Air Transport Agreement between Somali Democratic Republic and the Democratic People's Republic of the Korea.

PRESIDENT OF THE

SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

INSTRUMENT OF RATIFICATION :

Having Seen : The 1st, 2nd, and 3rd Charter of 21st. Revolution 1969.

Having Seen : Law No 1, 17, 18 and 19 of 1st July, 1976.

Having seen : The Air Transport Agreement between the Somali Democratic Republic and the Democratic People's Republic of Korea signed at Mogadishu on 9th July, 1979.

Taking Note : Of the approval of the Political Bureau and that of Council of Ministers dated 9th August, 1979.

Hereby promulgates the following law :-

Article I

The Air transport Agreement between the Somali Democratic Republic and the Democratic People's Republic of Korea signed at Mogadishu on 9th July, 1979, is hereby ratified.

Article II

This Agreement shall have the force of law in the territory of the Somali Democratic Republic in accordance with its Article 21 (2).

This law shall be published in the Official Bulletin of the Somali Democratic Republic.

Mogadishu 19 August 1979

MAJOR GENERAL MOHAMED SIAD BARRE

SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

Go'aan Jamb. 33 1979,

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE

HADUU ARKAY : Codsigii Caasho Nuur Cali waxay ku Saabsan tahay Ogeysiiska BANGIGA GANACSIGA IYO KEYDKA LAANTA KISMAAYO

MARKUU OGAADAY : in ay tahay Shaqo Xafiiskiisa ;

HADUU ARKAY : Qodobka 69XL. 9 ee soo baxay 9.9.1965

Lambarkiisa 2aad

Dhumida Buuga Keydka Lambarkiisu yahay — 5728 ee ku qornaa Magaca Casho Nuur Cali lacagti ku qorneydna ay aheyd 220/Sh ((LABO BOQOL iyo 20 — Sh)

WAXAA LA AMRAYAA

In loo cusbooneysiyo Buuga ka dhumay Caasho Nuur Cali Muddo 15 Beri Guddeheeda taas ka bilabmeysa Malinta lagu dhigo Faafinta Rasmi ah.

Haddaan la heelin qof kale oo sheegta Buugaasi waxaan ka loo la amrayaa in Buugaasi Gacanta laga saaro Gabadha ku qoran ama ciddi ayada ka sidata Wakaalad Buuxda oo aan shaki ku jirin.

Kismaayo 7.5.1979

GUDDOOMIYAHA

MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE

Dr Xiis Cumar Maxamed

L. L. 473

GO'AAN LAMB. 63/79

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE

DR XIIS CUMAR MAXAMED

HADUU ARKAY : Warqadda codsiga ah ee uu soo qortay Awees Cabdulaahi Iiko, ka tirsan Shaqaalaha W. Caafi-maadka ee Kismaayo Taariikhdu 7.6.1979, ee ku soo weydiistay in loo furo Buugga Lamb. 5923 ee Bangiga Kismaayo kaasoo ka dhumay kuna qoran tahay lacag dhan Sh. So 500/= (Shan boqol Shilin).

HADUU OGAADAY : in aay tahay shaqa Maxkamadeed oo ah in ay soo saarto Go'aan (Ammortamento).

HADUU ARKAY : Qodobada 69 X. L. 9 ee soo baxay 9.9.65/2

WAXAA LA CADEEYNAYAA

Dhumidda Buugga Keydka lamb. 5923/ ee Kismaayo Buuggaas ee uu qaatay Sanadkii 1979, kuna qornayd lacag dhan Sh. 500/= (Shan boqol Shilin) oo ku qoran magaca Aweeys Cabdulaahi Iiko.

WAXAA LA AMRAYAA

In loo cusbooneysiyo Buuga Keydka ee ka dhumay Aweeys Cabdulaahi Iiko muddo 15 (toban iyo shan) maalmood ah laga bilaabo markii lagu dhigo Faafinta Rasmiga ah, hadaan la helin qof kale oo Buugaas sheegta, waxaa kaloo la amrayaa in Buugaas Gacanta laga saaro Ninkaa la dhaho Aweeys Cabdulaahi Iiko, ama qofkii ka sita warqad sharci ah.

Kismaayo, 9.6.1979

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. J. HOOSE

DR XIIS CUMAR MAXAMED

JAMHUURIYADDA DEMOQRADIGA SOOMAALIYEED

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR

GUDOOMIYAHA

HADUU : Akhriyey dacwadda kor ku qoran;

HADUU HUBSADAY : in Jeegaga Wareega ee dhumay oo Lambarkoodu ahaa 132521, 132522, lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed laanta Berbera kuna qornayd lacag dhaan Sh So. 50.000/=kiiba iska lahaa Jaamac Muuse Faarax sida ku cad Warqadda lamb. 009864 taariikh 21. 8. 1979 oo bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed laanta 5aad.

HADUU ARKAY : qod 69 sharciga lam. 2 ee 9. 9. 1965

WUXUU XEERIYEY

In la baabiyo (ammortamento) Jeegaga lamb. 132521, 132522 oo ku qoran magaca Jaamac Muuse Faarax ayna ku jirto Sh So. 50.000 kiiba.

WUXUU XEERIYEY

In bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Berbera u bedelo Jaamac Muuse Faarax 2 Jeeg wareega ee ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto mudo aan ka yarayn 15 maalmood, maalinta go'aankan lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee JAMHUURIYADDA DEMOQRAADIGA SOOMAALIYEED, haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 21. 8. 1979

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR

GUDOOMIYAHA

HADUU AKHRIYEY : dacwadda kor ku qoran;

HADUU HUBSADAY : in Buuga keydka dhumay oo lambar-kiisu ahaa 13796, lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed laanta laad kuna qornayd lacag dhan Sh So. 1.120 uu iska lahaa Maxamed Xaaji Axmed sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 6254 taariikh 29. 8. 1979 oo bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed laanta 5aad.

HADUU ARKAY : qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.1965

WUXUU XEERIYEY

In la baabiyo (ammortamento) (buugga kaydka lam 13796, oo ku qoran magaca Maxamed Xaaji Axmed ayna ku jirto Shs So 1.120/.

WUXUU FASAXAY

In bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta laad u beddelo Maxamed Xaaji Axmed buuga keydka ee ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto mudo aan ka yarayn 30 maalmood, maalinta go'aankan lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee JAMHUURIYADDA DEMOQRAADIGA Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 30 8. 1979

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR

Cabdullaahi Maxamed Maax